

Warqad wargalin ah oo loogu talo galay daryeeleyaasha oo ku saabsan arrimaha qoyska

I. Guud ahaan

La wareegista fulinta Masuuliyadda Xannaanaynta waxaad buuxinaysaa waajibaadka Muwaadinka saaran. Waxaad la wareegaysaa shaqo iskaa wax u qabso ah, kaa soo aad u qabanaysid si damiir fiican leh iyo masuuliyad leh kaa soo si gaar ah u xiisaynayo fulinta danaha qofka daryeelkiisa/Keeda masuulka laga yahay.

Sharuucda faraya arimaha daryeelidda ku saabsan waxay ku qoran yihiin buuga Xeerka Rayidka (§§ 1776, 1777, 1809 illaa 1813) oo laga helayaa.

Sida laga soo xigtay § 1813 Buuga Xeerka Rayidka waxaa laga helayaa Xeerka ka dhaqangalayo Masuul (§§ 1773 illaa 1808 Buuga Xeerka Rayidka) inta laga adeegsanayo. Waxaa lays farayaa in Qodobaddan si fiican loo xafido ama barto.

Maxkamadda Qoyska way kugu kormeeraysaa wax qabadkaaga, waxay kaala talinaysaa wax alaaliyo wixii su'aallo ah ee arintaa ku saabsan.

Waxay Maxkamadda Qoyska Wakhti kasta kaa dalban kartaa Warbixin ku saabsan wax qabadka lagu idmadday.

Waxaad tahay qofka Daryeelidda masuul ka ah oo wixii dhibaato ah ee ka yimaada jebinta waajibaadkaada aad masuul ka tahay gaar ahaa, hadaad dayacdid waajibaadkaagii, Masruuf-ama wax kale ka dalbatid qofka aad daryeelkiisa lagu xilsaaray. Khatarta waxaad ka geli kartaa Caymis, macluumaad intaa dhaafsiisan waxaad ka helayaa Maxkamadda Qoyska.

Lacagta qofka la daryeelayo, ee looga baahan yahay kharashkeeda (lacagta la siinayo), waa in lagu hayaa oo diyaar ku ahaataa akoontka bangiga. Lacagta qofka la daryeelayo ee aan loo baahnayn waa in lagu shubaa meel lagu maal-galinayo (lacag maalgashi), maashaas oo ah akoont bangi oo dulsaar leh oo ku haboon (akoont maal-gashi). Bangigu waa inuu ka tirsan yahay nidaam dammaanad qaad ah oo ku filan maalgashiga. Nooc kasta oo kale oo maalgashi, oggolaanshaha maxkamadda qoyska ayaa loo baahan yahay.

II. Waxay qusaysaa oo kaliya masruufka daryeelka xanaanaynta

Waa inaad arimaha soo socda si gaar oga taxadartaa:

1. Waajibka ku saaran wuxuu yahay inaad marka hore aad isku taxluujisid, sidraad waalidka qaybta masuulka ah bixinta masruufka ilmahiisa uu masruufka bixiyo. Arintaasi waxaad marka hore ku dalbataa qaab qoraal ah. Sharciga Masruufka waa §§ 1601 illaa 1615 oo lagu xusay buuga Xeerka Rayidka. Masruufka wuxuu ku xidhan yahay haddba sidda uu yahay qaab-nololeedka ilmaha u baahan yahay iyo waxaa ka mid ah mabda'ahaan wax alaaliyo wixii inuu ku noolaado ugu baahan yahay, kaa soo ka mid ah Qarashka Barbaarinta iyo Tababarka Xirfadaha. Sharciga uma qoondaynin Qarsh go'an. Waalidka qaybta Masruuf bixinta ku waajibka ah, waa ku waajib xataa hadduu saamayn xun ku yeelanayo dayactirka noloshiisa. Hadday arinta siddaa noqoto, wax allaaliyo wuxuu leeyahay ayaa si isku dhayli tiran ay Masruufka u isticmaalayaan isaga iyo ilmahaba. Inta ay qarashkaasi noqon doono markan oo kale wuxuu ku xidhan yahay daqliga soo gala sidda uu yahay.
2. Masruufka soo galayo waxaa loo adeegsanayaa oo kaliya la daryeelaha/la daryeeladda baahidooda
3. Hadduu Waalidka bixinta Masruufka si iskood ah u bixin waayo/waydo, markaa oo kale waxaa kugu waajib ah inaad digniin aad kaga dalbanaysid bixinta Masruufka aad u dirtid

adigoo ku hadlaya magaca qofka la daryeelayo lab ama dhedig waxaadna ku cadaadin kartaa xag Maxkamadeed. Waxaa Suutogal ah inaad halkaa u adeegsatid Xafiiska dhaliyaradda ama Maxkamadda Deegaanka, kuwaasoo warbixino dheeri ah ku siin kara, balse aysan si sharci ah aan kuula talin karin.

III. Waxuu dhamaanayaa Daryeelka laguu xil saaray

Shaqadaada waxey dhamaanaysaa

- a) Marka ay dhamaato mas'uuliyadda daryeelka ay bixisay maxkamadda qoyska.
- b) Daryeelka Waalidka Caruurta ama Qof Masúul looga dhigay in uu Caruur daryeelo, waxey dhamaaneyso Daryeelkooda marki laga joojiyo in ey wax daryeelaan,
- c) Markay tahay daryeelka ilmo aan weli dhalan, marka ilmuhu dhasho,
- d) Qof Daryeelka ah oo loo xil saaray in uu mar mar u adeego Qofka la daryeelayo marki uu adeegga dhameeyo